

ISMAAMULKA
SAN DIEGO

BARNAAMIJKA ILAALINTA WARAHA BIYAHA

Munaasabadaha Gaarka ah

Barnaamijka *Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego* ayaa ka taageeraaya qaban qaabiyaasha munaasabadaha dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

- ! Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, majroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.

Nidaamiyaasha Munaasabada iyo Codsadeyaasha Ruqsada ayaa gacan ka gaysan kara nadiifinta marinnada biyaheena ayagoo dhaqan gelinaaya BMP-yada soo socda ee biyaha daadka si looga hortago wasaqaynta biyaha. Marka aad tahay Munaasabad Abaabule ama Codsadaha Ruqsad, talaabada koowaad waa aqoonsiga ilaha keeni kara wasaqda si loo dhaqan gasho BMP-yada.

Kahor Munaabada

- ❑ Difaac oo dabool dhammaan marinnada biyaha daadka ee aaga munaasabada.
- ❑ Dhig Musqulaha La qaadi karo meelo ka fog biyaha daadka ama waraha biyaha.
- ❑ Dhig qasacyada qashinka iyo qasacyada qashinka dib loo warshadeeyo meelo ku haboon oo daboolka u adkee si loo yareeyo qashinka dabayshu qaadayso.
- ❑ Diyaarso alaabaha iyo qalabka lagu xakameeyo waxyaabaha daata (tusaale, gufada waxyaabaha daata, roogaga) oo dhigo meel aad degdeg ugasoo qabsan karto.
- ❑ Bar shaqaalaha munaasabada inay si sax ah u adeegsadaan agabka iyo qalabka nadiifinta waxyaabaha daata.

tilmaamo dheeraad ah >>>

Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater si aad u hesho gabaad Biyo Difaaca Waraha Biyaha (WPO).

FEEBARAAYO 2021



waan
**difaaci karnaa
marinadeena biyaha**

ayadoo la qaadayo keliya
dhawr talaabo.



Musqulaha la qaadi karo oo la dhigo meelo ka fog marinnada biyaha roobka.



Xaaq, aruuri, oo gur qashinka/wasaqda

Inta Lagu jiro Munaasabada

- ❑ Adeegso qaababka nadiifinta ee qalalan sida xaaqida, tirtirista, haawinta, iyo sifaynta.
- ❑ Xaaq oo ka bixi meesha wasaqda, caleemaha, qashinka, iyo xashka aagaga la maro.
- ❑ Ka saar qashinka, xashka, iyo waxyaabaha adag aagaga dhulka la falaayo.
- ❑ Si joogto ah u daadi qashinka iyo agabka la qarshadeeyo si joogto ah si aad uga hortagto in qasacyadu xad dhaafaan.
- ❑ Si joogto ah u nadiifi wasaqda marka ay dhacaan.
- ❑ Soo dhaji boorar si aad ugu booriso inay soo sheegaan marka nadiifin ama dayactirka musqulaha la qaadi karo loo baahan yahay.
- ❑ Xakamee dhammaan waxyaabaha daata ee goobta. Isla markaba u sheeg wax kasta oo daata ama dilaaca oo gaaraaya nidaamka daadka biyaha adoo wacaaya Laynka Biyaha Daadka oo ah (888) 846-0800.

Ka dib Munaasabada

- ❑ Daboolka ka qaad marin kasta oo biyaha daadku maraan ee daboolan inta munaasabadu socoto.
- ❑ Samee kormeerka ugu danbeeya ee xarunta.



Biyaha daadka ee aaga daboolan maraaya



Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego ayaa samayn doona kormeeraha goos-gooska ah ee marinnada biyaha daadka si loo qiimeeyo in goobta si sax ah loo ilaaliyay. **Ku fashilmida xakamaynta iyo aruurinta qashinka iyo agabka ka dhasha munaasabada, ayaa keeni karta in Iskuduwaha Munaasabada laga qaado talaabo ganaax ah, lacag ganaax ah, iyo in mustaqbalka loo diido ruqsada munaasabadaha.**



Waad ku mahadsan tahay

inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.



Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater si aad u hesho gabaad Biyo Difaaca Waraha Biyaha (WPO).